

**Guddiga KMG ah ee
Doorashooyinka Puntland**



**Transitional Puntland
Electoral Commission**

HAGAHA KOR-JOOGTADDA MAXALIGA IYO CAALAMIGA AH EE DOORASHOYINKA GOLOYAASHA DEEGAANKA

SEPTEMBER, 2021



1.0 Hordhac

Guddiga KMG ee doorashooyinka Puntland waxaa loo aasaasey qabashadda shaqooyinkan soo socda: maamulidda iyo qabashadda doorashooyinka dowladaha hoose, diiwaan-gelinta ururadda siyaasadda, diiwaan-gelinta muwaadiniinta codeyn kara, diiwaan-gelinta saddex urur siyaasadeed eek u guuleysta kadib qabashadda doorashooyinka dowladaha hoose iyo dhameystirka dhammaan shaqooyinkaas. Guddiga KMG doorashooyinka waxay jidka usii xaareysaa Guddiga rasmiga ah ee doorashooyinka Puntland.

Xeerka Guddiga doorashooyinka, qodobkiisa 2aad (1) wuxuu cadeynayaa in Guddigu yahay mid madax banaan, awoodna loo siiyey in uu go'aamiyo howlaha la xiriira waajibaadkiisa. Sidoo kale, qodobka 3 (2) wuxuu siinayaa guddiga KMG ah ee doorashooyinka Puntland masuuliyad ay ku qabtaan doorashadda golayaasha degaanka Puntland, waxa kale oo xeerka diiwaan-gelinta qodobkiisa 12^{aad} uu awood siinayaa Guddiga sidii ay u sameyn la haayeen hagaha kor-joogtadda doorashooyinka.

Waxaa jira xeerar, heshiisyo iyo baaqyo caalami ah oo ka hadlaya doorashooyinka loogana gol leeyahay sidii loo xaqiijin lahaa qabashadda doorashooyin hufan. Hadaba, Guddiga waxuu diyaariyay hagahan si loo xaqiijiyo in kor-joogteynta doorashadu tahay qaab lagu qiimeynayo fulinta xeerarka iyo baaqyadda caalamiga ah inta lagu guddo jiro meertadda doorashooyinka Puntland. Waxayna xeerarka iyo baaqyadda caalamiga ahi kala yihiin; Baaqa mabaadiida caalamiga ah ee kor-joogteynta doorashooyinka iyo Qodobadda habdhaqanka ee kor-joogtadda caalamiga ah, baaqa caalamiga ah ee xaquuqda aadanaha, heshiiska caalamiga ah ee xaquuqda madaniga iyo siyaasadda (ICCPR), heshiiska caalamiga ah ee suulinta faquuqa haybta ku saleysan (CERD), heshiiska caalamiga ah ee suulinta dhammaan noocyadda faquuqa ka dhanka ah haweenka (CEDAW), mabadiida hagaha ah ee Qaramadda Midoobey ee barakacayaasha.

Sidaas awgeed, hagaha kor-joogtadda doorashadda waxaa soo saarey Guddiga KMG ah ee doorashooyinka, hagahani wuxuu tilmaamayaa dhammaan shaqooyinka inta lagu guddo jiro meertadda doorashadda.

Hagaha kor-joogtadda doorashooyinki wuxuu koobayaa dhammaan shaqooyinka inta lagu guddo jiro meertadda doorashadda, waxaana ka mid ah shaqooyinkan hoos ku xusan;

- Diiwaan gelinta codbixiyayaasha
- Shaqadda maalinta doorashadda golayaasha deegaanka
- Shaqadda maalinta doorashadda baarlamaanka
- Isku duboridda iyo hagaajinta waraaqaha cod-bixinta

Kor-joogteynta doorashaddu waa shaqo muhiimad weyn u leh kor u qaadidda tayadda doorashadda. Waxay hanaanka doorashadda u keenta daah-furnaan, sharaf iyo isla xisaabtan, hadaba hagahan waxaa looga gol-leeyahay in uu tilmaamo kor-joogtadda.



1.1 Eray-bixin

Erayaddan waxaa macnahooda loola jeedda sidatan:

- a. 'Kor-joogto doorasho' waxaa loola jeeda kor-joogto maxali amma caalami ah kaasi oo uu aqoonsan yahay Guddiga doorashadda.
- b. 'Codsadde' waxaa loola jeedda koox kor-joogto ah, hay'ad kor-joogto ah, urur-bulsho
- c. 'Kor-joogto maxali ah' waxaa loola jeedda kor-joogteynta qeybaha kala duwan ee geediga doorashadda, hay'adaha maxaliga ee loo diiwaangeliyey qabashadda shaqaddaas. Kor-joogtadda maxaliga ah waxay kala noqon karaan qeybahan;
 - a. Ururadda Bulshadda ee Puntland
 - b. Ururadda Bulshadda ee dowladdaha xubnaha ka ah federaalka
 - c. Wakiiladda hay'adaha dowladda ee heer federaal
 - d. Ururadda qurba-joogta
- d. 'Kor-joogteynta caalamiga ah' waxa loola jeeda kor-joogteynta qeybaha kala duwan ee geediga doorashadda, hay'adaha caalamiga ah iyo dowladdaha deeqaha bixiya.

1.2 Ujeedooyinka Hagaha

Ujeedooyinka hagahan waa sameynta;

- (a) Hanaanka codsashadda iyo aqoonsashadda kor-joogtadda
- (b) Wax yaabaha laga rabo codsadhaha kor-joogtadda
- (c) Tilmaamaha fulinta qodobadda habdhaqanka (Code of Conduct)

2.0 Awoodda Aqoonsi bixinta

Aqoonsi bixintu waa hab uu Guddiga doorashaddu ku xaqiijiyo, isla markaana si rasmi ah ku amro howl-gelinta kor-joogtadda, waana sharuud laga rabo hay'ad iyo qof walba oo kor-joogto ka sameynaya Puntland. Guddiga KMG doorashadda Puntland waa hay'adda keliya ee bixin karta aqoonsiga kor-joogtadda. Aqoonsigu waa waxa saxda ah ee ku siineysa in aad galaangal u yeelato dhammaan goobaha ay ka socoto howlaha doorashaddu.

3.0 Casumaada codsashadda

- 3.1 Bilowga xili doorashadda, Guddiga waxay fursad-siin doonta kor-joogtadda si ay usoo gudbistaan codsiyadooda helidda aqoonsiga Guddiga. Guddiga doorashaddu wuxuu baahin doonaa ogeysiisyadda qabashadda codsiyadda kor-joogtadda, iyadoo si rasmi ah codsiyo ugu gudbinaya hay'addaha kor-joogtadda maxaliga ah iyo tan caalamiga ah.
- 3.2 Hay'addaha iyo dowladdaha deeq bixiyayaasha waa in ay Guddiga doorashadda la socodsiiyaan qorshayaashooda ah inay soo dirayaan kor-joogto maxaliya amma caalami ah.
- 3.3 Codsadayaasha kor-joogtadu waa in ay codsiyadooda kusoo diraan cinwaanadda ay baahiyeen Guddiga doorashadda.



3.4 Qodobadda shuruudaha ah ee laga rabo codsadhaha; dhammaan codsadyaasha daneynaya in ay ka qeyb galaan shaqooyinka kor-jooqteynta doorashadda, waa in ay leeyihiin qodobaddan;

- Waa in uu leeyahay aqoon iyo fahan uu ka haysto Puntland iyo Soomaaliya guud ahaan.
- Waa in uu leeyahay khibrad hore oo ah kor-jooqteynta doorashadda, khibrado kale, tababoro, waayo aragnimo maxaliya iyo mid caalami ah.
- Karti qofeed – go'aan qaadashadda hufan, wadda-shaqeynta kooxaha, ku shaqeynta xaaladaha qalafsan, tixgelinta dhaqamadda maxaliga ah, xirfadda tebinta haboon, ka shaqeynta goob xasaasi ah.
- Waa in uu ku shaqeyn karo madax-banaani iyo dhex-dhexaadnimo inta uu ku gudo jiro shaqada.
- illaalinta dimuqraadiyadda iyo xaquuqda bini'aadamka.
- Waa in uu ku adag yahay shaqadiisa, qodobadda habdhaqanka iyo sumcadda Guddiga kor-jooqtadda.

3.5 Dukumentiyadda la rabo in lasoo gudbiyo. Codsadyaasha waxaa laga rabaa in ay soo gudbiyaan;

1. Foomka codsiga ee aqbalaadda
2. Buuxi foomka aqbalaadda, adigoo soo raacinaya baasaboorka, sawir, waraaqda cadeynta ee u hogaan-sanaanta qodobadda habdhaqanka, cadeynta hay'adda aad matelaysid.

3.6 Si qofka loogu aqoonsado kor-jooqte maxaliya amma caalami ah, waa inay hay'addi soo dirsato qoraal ahaan, laguna soo aadiyo guddiga doorashadda.

3.7 Guddiga KMG doorashadda Puntland waxaa uu qiimeyn ku sameynayaa codsiyadda la qabtey, waxayna eegayaan in lasoo buuxiyey sharuudihii. Go'aanka Guddiga ee ogalaanshaha amma diidmada codsadyaasha waxaa lagu gaarsiinayaa hab qoraal ah.

4.0 Aqoonsi bixinta

4.1 Marka Guddiga aqbalo codsiga aqoonsashadda, waa in lagu wargeliyo, lana siiyo kaarka aqoonsiga codsadyaasha kor-jooqtadda dadka/hay'adda soo codsatey.

4.2 Hay'adda kor-jooqteynta laga aqbaley si ay u kor-jooqteeso hanaanka doorashadda waa in Guddigu siiyo waraaq aqoonsiga kor-jooqtadda.

4.3 Qof walba oo ah kor-jooqto maxaliya amma caalami ah waxa laga rabaa in uu layimaado aqoonsiga rasmiga, una soo gudbiyo Guddiga doorashadda ka hor inta aysan shaqadu bilaaban.



5. Xaquuqaadka qofka/hay'adda kor-joogtadda loo aqoonsado

- Koox walba oo kor-joogto ah waxay xaq u leedahay in lasiiyo nuqulka qodobadda habdhaqanka iyo warbixinadda ay soo saaraan Guddiga.
- Kor-joogtadda la'aqoonsadey waxay xaq u leeyihiin in ay kor-joogteeyaan dhammaan heerarka doorashadda sida diiwaan-gelinta cod-bixinta, iyo goobaha cod tirinta.
- Kor-joogtadda la'aqoonsadey waxay xaq u leeyihiin inay warbixino ka helaan dhaamaan heerarka kala duwan ee hay'addaha doorashadda.
- Kor-joogtadda la'aqoonsadey waxay xaq u leeyihiin in ay warbixintooda kor-joogteynta ay la wadaagaan dadweynaha iyo warbixino ka hadlaya hadba shaqaddu meesha ay mareyso.
- Kor-joogtadu waa in ay helaan dhaqdhaqaaq xor ah.

6. Waajibaadka qofka/hay'adda korjoogtadda loo aqoonsado

- Waa in uu xirto kor-joogte walba kaarka aqoonsiga, kuna xirto meel muuqata.
- Waa in uu dhex-dhexaad noqdo marwalba, iskana ilaaliyo shaqooyin gaar u ah garab siyaasadeed amma wax u daneynaya urur/xisbi amma tartame.
- Marnaba ha xiran calaamad amma sumad u eg amma lamid ah kuwa ururadda/xisbiyadda amma musharaxiinta.
- Iska ilaali in aad saameyn ku yeelato cod-bixiyayaasha.
- Ka qeyb qaado shaqadda adiga oo aan farogelin amma carqaladeyn howlaha socda ee doorashadda.
- Iska illaali innaad warsiiso saxaafadda adigoo ka faaloonaya kor-joogteynta doorashadda.
- U hogaansan awaamiirta saraakiisha Guddiga inta lagu guddo jira dhammaan heerarka doorashadda.
- Ha farogelin waxyaabaha u gaarka ah isdiwaan-geliyayaasha iyo cod-bixiyayaasha, (ha eegin cod-bixiye buuxinaya waraaqda, ha qoran xog gaar u ah isdiiwaan-geliyaha amma cod-bixiyaha, sida magacyadda tartamayaasha amma ururadda/xisbiyadda ay u codeeyeen).

7.0 inta ay gaarsiisan tahay kor-joogteyntu

Kor-joogtadda maxaliga amma caalamiga waxay qiimeynayaa qodobadda soo socda;

- a. Dhex-dhexaadnimadda iyo habka xirfadeysan ee saraakiisha doorashadda
- b. Dhex-dhexaadnimadda Guddiga
- c. Si joogto ah u adeegsiga habraacyadda iyo xeerarka
- d. Sida loogu wadda dhan yahay hanaanka doorashadda
- e. Adeegsiga saxaafadda
- f. Hab-dhaqanka iyo xirfadda hay'addaha amniga
- g. Jawiga doorshadda
- h. Raacidda qodobadda habraacyadda caalamiga ah
- i. Daahfurnaanta iyo helitaanka hanaanka doorashadda



- j. Qarsoonaanta waraaqaha cod-bixinta
- k. Saxnaanshaha cod-tirinta
- l. Heerka tacadiyadda xaquuqaadka bini'aadamka iyo qalalaasaha la xiriira doorashadda

8.0 Mudadda kor-joogtadda

Mudadda kor-joogteynta waxay noqon doonta sidatan;

- a. Kor-joogteynta doorashadda waxay bilaabaneysaa taariikhda la bixiyey aqoonsiga iyo waxayna dhammaan xiliga lagu qorey kaarka aqoonsiga.
- b. Hab-raacyaddan waxa lagu fulinayaa kor-joogtadda maxaliga amma caalamiga ah kuwaasi oo lasiiyey aqoonsiga ay bixisay Guddiga doorashadda.

9.0 Warbixinadda

Hay'adda kor-joogtadda waxay siin doonaan nuqulo warbixinta kor-joogtadda Guddiga doorashadda, muddo 60 maalmood ah oo ka bilaabaneysa maalinta doorashadda lagu dhawaaqey.

10. Kala laabashadda aqoonsiga

Guddiga waxay laali kartaa aqoonsiga lasiiyey kor-joogtadda marka;

1. La jebiyo hab-raacyadda, xeerarka iyo qodobadda habdhaqanka kor-joogtadda
2. Carqaladeynta hanaanka doorashadda
3. Weydiinta cod-bixiyayaasha cidda ay u codeynayaan marka lagu guddo jiro goobaha codbixinta
4. Ololeynta amma muujinta taageero musharax/urur/xisbi



Foomka Codsashadda Aqoonsiga Kor-joogtadda

1. Magaca Codsadaha:

2. Cinwaanka Codsadaha:

3. Faahfaahinta meesha laga helo codsadaha:

Telefoon: _____

Email: _____

4. Tiradda dadka loo magacaabayo kor-joogtadda:

5. Qofka xiriiriyaha ah ee ka socda codsadaha:

6. Xog kooban oo ka warbixineysa Codsadaha:

7. Si kooban, hadafka codsadaha kor-joogtadda (Hay'adda), ayna ka mid yihiin shaqooyinka ay rabto in ay kor-joogteyso (Lifaaq ahaan u raaci haddii loo baahdo):



8. Xogta dadka uu soo gudbiyey codsaduhu;

Magaca	Xilka	Aqoonsiga / Tirsiga Baasaboorka	Dhalashadda	Taariikhda imaanshaha iyo noqoshadda

Dakumentiska la socda:

Codsiga waxaa la socda dakumentiska hoose;

- Dakumentiska Codsadaha
- Qoraal koobaya sababaha codsadaha ugu haboon yahay in lasiiyo aqoonsi uu ku kor-jooqteeyo shaqooyinka doorashadda.
- Qoraal cadeynaya in aad u hogaansameyso lashaqeynta Guddiga.

Waxaan halkaan kusoo gudbineynaa aqoonsiga kor-jooqtanimo, waxaanu cadeyn in dadka, xogta iyo dakumantiyadda la socda ay yihiin kuwo sax ah, waxaanu xaqiijin in dhammaan dadkaas lasoo gudbiyey ay fahansan yihiin ayna u hogaansamayaan qodobadda hab-dhaqanka ee kor-jooqtanimadda.

Magaca _____

Taariikh _____

Xilka



Qoraalka cadeynta ku dhaqimidda qodobadda hab-dhaqanka ee kor-joogtadda doorashadda – Gudoomiyaha Guddiga kor-joogtadda

Aniga oo ah _____ (Magaca codsadhaha kor-joogtadda doorashadda) waxaan halkaan ku cadeyn in magacaabidda ku qoran lifaaqa kowaad ee codsiga aqoonsiga ee loo gudbiyey Guddiga KMG doorashooyinka ay yihiin dadka keliya ee helaya aqoonsiga kaararka ee ay bixisay Guddiga, una gudbisay hay'adda codsatey kor-joogteynta. Kaararka aqoonsiga waxa loo isticmaali doona keliya ujeedadda kor-joogteynta hanaanka doorashadda.

Waxaan kaloo halkaan ku cadeyn in dadka loo magacaabey kor-joogteynta ay u hogaansami doonaan xeerarka Puntland, qodobadda hab-dhaqanka kor-joogtadda doorashadda, iyo qodobadda kale ee ku saabsan awaamiirta ay soo saaraan Guddiga doorashadda ee Puntland.

Saxiixa Gudoomiyaha / Xoghaya:

Taariikh



Qodobadda Hab-dhaqanka ee kor-joogtadda doorashadda

Kor-jooge la aqoonsan yahay waxaa laga filayaa in uu u hogaansamo qodobaddan hab-dhaqanka ee soo socda;

1. Kor-joogtadu waa in ay xushmeeyaan una hogaan samaan dhammaan xeerarka iyo xeer-nidaamiyayaasha dowladda iyo Guddiga doorashadda ee masuulka ka ah maamulidda doorashadda.
2. Kor-joogtadu waa in aysan carqaladeyn, sameyna faro-gelin taaso kharibi karta hanaanka doorashadda, sida hanaanka doorashadda kahor, codeynta, tirinta iyo howlaha doorashadda kadib.
3. Kor-joogtadu waa in ay qaataan, muujiyaana kaarka aqoonsiga ee Guddiga bixiyay, waana in uu ka muuqdo inta ay ku guddo jiraan shaqooyinka kor-joogtadda ee doorashooyinka, waana inay sitaan waraaq cadeynta ah ee Guddiga.
4. Kor-joogtadu waa in ay u hogaansamaan dhammaan awaamiirta waafaqsan sharciga ee kasoo baxa xukuumadda, amniga iyo hay'addaha doorashadda. Sidoo kale, kor-joogtadu waa in ay saraakiisha doorashadda iyo hay'addaha kale u muujiyaan hab-dhaqan xushmadi ku dheehan tahay.
5. Kor-joogtadu waa in aysan sameyn wax shaqo ah oo muujin kara amma loo arki karo wax u xaglinaya tartame siyaasadeed, sida xirashadda calaamadaha, midabadda, boorarka amaba ka gudoomidda hadiyad oo kale.
6. Kor-joogtadu waa in ay iska illaaliyaan adeegsiga erayo sababi kara nacayb amma hayb sooc ku dhisan qabiil, gobol, dabaqad, naafanimo amaba sababi kara dareen diimeed inta lagu gudo jiro doorashadda.
7. Kor-joogtadu waa in ay si dhow ula shaqeeyaan xafiiska Guddiga doorashadda, lana shaqeeyaan saraakiisha doorashadda, kormeerayaasha iyo cid walboo shaqo loo xilsaarey.
8. Kor-joogtadu waa in ay yihiin dad karti leh, aruursan, lehna dhaqan xirfad sare oo ay ku kor-joogteeyaan doorashadda.
9. Kor-joogtadu waa in ay ka warqabaan Guddiyadda kor-joogtooyinka kale ee caalamiga amma maxaliga ah, ayna kula shaqeeyaan sida uu faro hogaanka Guddiga korjoogtadda.
10. Kor-joogtadu waa in ay ahaadaan dhex-dhexaad marwalba. Waa in aysan arrimaha la'isku qabto ee doorashadda dhinacna aysan u muujin garab.
11. Kor-joogtadu haday arkaan wax khaldan waxay la socodsiin karaan saraakiisha doorashadda, balse ma siin karaan awaamiir ku socota saraakiisha doorashadda.
12. Kor-joogtadu wixii cabasho baqdin gelin ah amma jebin sharci ah waxay warbixin siin hay'addaha ay matalayaan.
13. Kor-joogtadu waa in ay ku wargeliyaan Guddiga doorashadda haddii ay jiraan xiriir amma dano ay la leeyihiin tartamayaasha amma urur/xisbi siyaasadeed.



14. Kor-joogtada warbixinadooda waa in ay yihiin kuwo sifiican u qoran, kuna saleysan xaqiiqo iyo run, waana in ay xifdiyaan galalka shaqadda korj-oogtadda.
15. Kor-joogtadu waa inay iska illaaliyaan hadaladda shaqsiga ah ee ay mariyaan warbaahinta kahor inta aan Guddigu soo saarin warbixintiisa guud, haddii aysan jirin ogolaansho uu bixiyey hogaanka Guddiga kor-joogtadda ah.
16. Kor-joogtadu waa in aysan ku dhaqaaqin wax khatar gelin kara naftooda, badqabka naftooda ayaa ka muhiimsan wax walba.
17. Marwalba iyo goor-walba kor-joogte kasta waa in uu u dhaqmaa si bilaa eed ah, mar walbana dhowrsanadaa.
18. Kor-joogtadu waa in ay xaadiraan dhammaan kulamadda kala warqaadashadda, ayna u hogaan samaan qorshaha kor-joogteynta iyo awaamiirta kale ee kasoo baxa Guddiga doorashadda.
19. Kor-joogtadu waa in ay xushmeysaa natiijadda rasmiga ah oo ay soo saaraan Guddiga doorashadda.

Waan akhriyey fahmeyna qodobadda hab-dhaqanka ee kor ku xusan. Waxaan halkaan ku xaqiijinayaa in aan u hogaansamo qodobadda hab-dhaqanka, dhammaan shaqooyinkega ka kor-jooge ahaan waxaan u qaban doona si waafaqsan qodobaddan.

Waxaan fahan sanahay jebinta qodobadda hab-dhaqanka inay keeni karto in leykala noqdo aqoonsiga kor-joogtanimu amaba in leyga saaro Guddiga korjoogtada.

Saxiixa: _____

Magaca: _____

Taariikh: _____



Qoraalka cadeynta kor-joogtadda doorashadda

Anigoo ah _____ (magaca)
waxaan halkaan ku cadeyn balan qaadkeyga kor-joogtanimo, matalayana
_____ (Magaca hay'adda) si
aan u kor-joogteeyo hanaanka doorashadda.

Waxaan u hogaansami doona xeerarka Puntland, qodobadda hab-dhaqanka kor-joogtadda
doorashadda, iyo awaamiirta kale ee kasoo baxa Guddiga doorashadda.

Waxaan fahan sanahay jebinta qodobadda hab-dhaqanka inay keeni karto in leygala noqdo
aqoonsiga kor-joogtanimo amaba in leyga saaro Guddiga korjoogtada.

Saxiixa korjoogaha: _____

Taariikh: _____